



Blue Cross and Blue Shield of Minnesota

Foundation

An independent licensee of the Blue Cross and Blue Shield Association

# Waxwadaqabsi loo dhanyahay: Caafimaadka iyo Bulshada

*Muqaalka iyo mustaqbalka ee gobalka Minnesota waxaa kamid ah Mareykanka cusub (New Americans)*



## Arimo la xiriira barmaamijka

Waxwadaqabsiga loo dhanyahay ee caafimaadka iyo bulshada: Muuqaalka iyo mustaqbalka ee gobalka Minnesota waxaa ka mid ah Mareykank cusub. Taasi si ay u suurto gasho waxuu barmaamijku wadashaqeyn la yeeshay Kanaalka Telefishinka Bulshada ee Magaaloyinka Mataanaha ah. Si loo abuurto wacyigalin dhab ah oo ku saabsan iskuxirnaanta guud ee caafimaadka bulshada, gaar ahaan muhiimada ay leedahay caafimaadka dhimirka maskaxda iyo in ay dadka Mareykanka ah ee cusubi la qabsadaan arimaha ku saabsan habka caafimaadka bulshada ee looga dhaqmo gobalkan.

Barmaamijkan oo ah mid xiiso gaar ah leh waxaa saldhig u ah in la dhiso bulsho ka shaqeysa ururada samafalka ah (nonprofit organizations) ee ka jira Magaaloyinka Mataanaha ah iyo nawaaxigooda ee gobalka Minnesota. Waxaa la abuuray sida qofka shaqsiga ah iyo bulsho weyntuba ay u noqon lahaayeen kuwo aad isugu xiran oo caafimaad qaba, in ay dhici karto marka ay jirto iskuxirnaanta bulshada guud ahaan oo awood sare leh, waxaa la awoodaa in la helo fursado ay dadku si wadajir ah ama iyaga oo isku duubn u wada shaqeeyaan. Ujeedaduna waa in la helo hab wanaagsan oo dadka qaxootiga ahi ula jaanqaadaan caafimaadka bulshada inteeda kale ku dhaqanto. Ma aha barmaamijkani mid ku saabsan arimaha la xiriira dib u habeynta socdaalka (immigration reform).

Isku soo dubaridayaasha ams soo habeyyayaashu waxay kulan joogta ah la yeelan doonaan qaar ka mid ah qaxootigii ugu danbeeyay (cusub) ee yimaada Minnesota. Kuwaas oo ka kala yimid Koonfurta bari ee qaarada Asia iyo qaarada Afrika (Africa). Waxay la sameynayaan xiriir joogta ah inta ay ka baranayaan ama kala qabsanayaan hab dhaqanka caafimaadka bulshada inteeda kale. “Fiiri hogaanka wanaagsan ee ururka samafalka Somaliyeed ee Owatonna ku shaqeeyo si uu u taageero isfahan dhexmara qaxootiga cusub iyo dadkii dagaanka ku sii noolaa. Barmaamijkani waxaa kale oo uu horumar ka sameeyay isdhex galka dadka dhaqamada kalagadisan ee ku nool nawaaxiga Faribault, oo uu abuuray in ay yeeshaan ujeedooyin mideysan oo la taaban karo, kuwaas oo faaiido u leh dhamaan bulsha weynta dhaqamada kala duwan leh ee halkaas wada dagan.

Waxwadaqabsiga guud ee caafimaadka bulshadu waxay ka mid tahay in la helo hab caafimaad qab ah oo loo dhanyahay: Abuurida bulsho wada jirta oo maalgalisa dadka Mareykanka ee cusub waa hab wanaagsan oo looga gudbi karo isudheelitiranla'ant ka jirta caafimaadka dadka qaxootiga ah iyo bulshada inteeda kale, iyo waliba horumarinta guud ee caafimaadka bulsha weynta oo dhan. Maalgalinta (foundation) waxaa loogu deeqay kaalmo (grants) lagu xoojiyo sidii hab wanaagsan oo miro dhala la isgu xiri lahaa isfahan wanaagsan oo dhex mara dadka dhaqamada kaladuwan leh ee isku dagaanka ah iyo in ay dadka cusubi ka helaan bulshada inteeda kale taageero balaaran, gaar ahaan hogaanka ururada la shaqeeya dadka qaxooriga ah iyo in xooga la saaro dhanka caafimaadka iyo la qabsiga bulshada cusub eek u wajahan caafimaadka dhimirka maskaxda.

## Qorsheynta baaristaada

Si guul ama horumar looga gaaro baarista waxaa haboon in lagu bilaabo sameynta ama diyaarinta qorshe wanaagsan iyo soo uruurinta in la isweydiyo waxoogaa su; aalo ah oo u baahan in la siiyo tixgalin ama ahmiyad gooni ah:

- Ma fileysaa in ay fiican tahay in la sameeyo gudi soo qorsheysa iskudubaridida kulamada si ay u noqdaan kuwo soo jiidan kara kaqaybgalayaasha?
- Yaad rabtaa ama jeceshahay in ay noqdaan kaqaybgalayaasha kulankan?
- Yaad dooneysaa in uu howl fududeeye ka noqodo kulankan? (firi qaybta howl fududeynta)
- Ma u baahantahay in aad heshid Turjubaan?
- Goobtee iyo wakhtige kuugu haboon si aad uga soo qaybgashid kulankan?
- Gaadiid dadka lagu guro ma keeni kartaa ama caruurta ma ilaalin kartaa?
- Cunto qaybinta ma ka qaybqaadan kartaa? (cunto kusaleysan dhaqamada kaladuwan waxay soo jiidan kartaa dad badan oo kaqaybgalayaal ah)

- Talaabadeed dooneysaa in la qaado si baaristu u noqoto mid miro dhasha oo laga gaaro horumar fiican?
- Waakuwee xubnaha muhiimka ah ee loo baahanyahay in ay ka qayb qaataan ama caawiyaan, sidii loo sameyn lahaa talaabooyin laxiriira dabagalka iyo qiimeynta?

## Tix-raaca liiska

Isticmaal liiskan hoos ku qoran ee muhiimka ah si uu kaaga caawiyoo qorshaha, iyo habeynta wanaagsan ee kulanka.

### ***Kulank kahor***

- Samee gudigi qorsheysa oo soo maareysa habkii uu kulanku u dhici lahaa.
- Tus DVDga shirka ama kulanka ugu horeeya ee ay gudiga qorsheyntu yeelaneyso.
- Sharax ka bixi ujeedooyinka laga leeyahay in la sameeyo barista noocaas oo kale ah.
- Tilmaam sida ay yihiin kaqaybgalayaasha shirku ama kulanku, waa dad side ah.
- Hubi in aad haysatid howl fududeeye (yaal) wanaagsan oo khibrat iyo aqoon uleh shaqada hawlfududeynta.
- Diyaari maclumaadka la xiriira turjubaanada.
- Go'aan ka gaar meesha kulanku ka dhacayo iyo malinta kulanka la qabanaayo (dooro meel soojiidata kaqaybgalayaasha, hub in aanu jirin maalintaas kulan kale oo noocaas oo kale ahi).
- Bilow in aad sameyso ogeysiisyo (xayeysiisyo), ay ka qayb qaadanayaan gudiga qorsheynta iyo Turjubaanaduba.
- Haddii ay jirto cunto go'aan ka gaar nooca cuntada ah, iskudey in cuntadaasi noqoto mid aad looga helayo oo wanaageeda laga sheekeeyo.
- Go'aan ka qaado adeegyada kale ee muhiimka ah ee loo baahanyahay sida: (gaadiidka dadka lagu daad gureeyo, ilaalinta caruurta, iwm).

- Ogeysiis badan ka bixi (xayeysii) kulanka ka sheeg bulshada dhexdeeda, samee ogeysiis qoraal ah, (flyer) isticmaal barta internetka, jariiradaha ka soo baxa dagaankaas, taariikh dhowraha (calendar) iyo jariiradaha laga soo saaro kaniisadaha iyo Masaajidaba.
- Maaree oo ka feejignow haddii uu jiro wax aan caadi ahayen oo la doonayo in aan la sameynin iyo waxyaabah la rabo in ay hirgalaanba.
- Uruuri wixii qalab ah ee kulanka looga baahanyahay in lagu soo bandhigo (magaca dadku sitaan oo muuqanaaya, wixii warbixin qoraal ah oo ladiyaariyo, waraaqo iyo qalimaan, iyo qalin qoriyaal dheeraad ah).
- Tijaabi qalabka aad isticmaaleysid inta aadan bilaabin xaflada ama kulanka (hubi in wixii muqaal ah iyo qalabka codka soo daayaa ay si fiican u shaqeynayaan (AV system) iwm, iyo waliba in aad diyaarisid howl fududeeye (yaal) ku xeel dheer arimahan oo kale.
- Waa in aad haysataa shaqaale kugu filan, sida kuwa iskaa wax u qabsadayaal ah, xubnaha gudiyadu waa in ay maareeyaan habeynta iyo iskudubaridida kulanka.
- Diyaari qof macluumaadk soo uruuriya oo sameeya wixii qoraal ah ee loo baahanyahay iyo isku habeynta qoraaladaba.
- Xooga saar sidi uu kulanku u noqonlahaa mid guul ku dhamaada oo noqda mid miro dhala.

### ***Kulanka kadib***

- Samee mahadcelin la xiriirta kulanka oo aad u mahadcelineysid dadkii ka qybqaatey iyo dhamaan kasoo qaybgalayaashii kulankaba.
- U sheg kasooqaybgalayaasha in talaabooyinka la qaadaay ay ka mid yihiin in la la qaybsado wixii talo iyo tusaale ah oo loo soo gudbindoono wixii qoraal ah ee ka soo baxa kulanka.
- Waa in la buuxiyo foomamka qiimeynta, loona soo gudbiyo hay'ada maalgalinta ee Blue Cross Foundation.
- Meel ku ogow in dabagal iyo qiimeyn lagu sameeyo hirgalinta wixii talooyin iyo tusaale ah ee kulanka ka soo baxaya.

## Tix-raaca Guusha Hawl fududeeyaha

Si looga wada arinsado (xaajoodo) habka ugu fiican ee loo sameyn lahaa sidii hawsha loo fulin lahaa, shaqada hawl fududeeyuhu waa in uu abaabulo ama uu la yimaado meel (goob) haboon oo aan wax dhib ahi ka dhicin, si ay dadku isugu dhaafsadaan araa hooda iyo waxii dareen ah ee ay qabaan. Qofkaasi waa in uu ku dadaalaa in gudida sare ay ka soo qaybqaadato kulanka ay yeelanayaan ka qaybgalayaasha la soo casuumeey iyo in uu soo casuumo ka qaybgalayaa badan oo dhaqamo kala gadisan leh oo ka qaybqaata kulanka, Hubi in hawl fududeeyuhu yahay qof xirfad iyo waayo aragnimo badan uleh hawsha uu qabanaayo, si uu u daadihiyo wada hadalada iyo jawiga guue ee kulanka. Ogaysii kabixi barmaamijka kulanka ka hor si ay ka soo qaybgalayaashu u ogaadan wax uu ku saabsanyahay iyo ujeedada wada hadaladaba, waxaana haboon in lagu bilaabo su'aalo ku haboon ka soo qaybgalayaasha iyo dhageystayaashu nooca ay yihiin.

### *Tixgalin la xiriirta dhaqamada kala gadisan*

Si DVDga u noqdo mid si guud looga wada faaiideysto oo qayb libaax ka qaata horumarinta dhisida bulsho wanaagsan oo caafimaad qabta waxyaabaha lagu soo bandhigayo Telefishinka waa in tix galin sare la siiyaa dhamaan dadka dhaqamada kala gadisan leh, iyadoo ay joogaan gudiga sare ee kulanku, si ay u xaliyaan waxii dhibaato ama khilaafaad ah ee halkaas ka soobaxa. Waxaa loo baahan yahay in qof waliba ka qayb qaato haddii ay noqon lahay dhanka xirfada ama wax qabadka iyo haddii ay noqon lahayed dhanka dhaqaalahaba. Marka wax walba wadajir loo abaabulo ama looga shaqeeyo waxaa ka dhasha miro wanaagsan ama waxaa la gaaraa horumarkii looga danlaaha, waxaana la abuuraa hab wanaagsan oo lagu xaliyo haddii ay soo baxaan wax khilaafaad ah oo aan loo baahaneyni, waxaana lagaaraa xal dhab ah oo raga.

### *Turjubaanka iyo turjubaanimada*

Shaqada turjubaanada ee ah ka afcelinta luuqada waxaa kale oo ay u adeegayaan sidii in ay noqdaan kuwo turubaanimadooda ku saleeya sidii dhaqan ahaan loo fahmi lahaa afka ama luuqada ay ka turjumayyan, waa haddii gudiga aad u xilsaartey arimah qorsheynta ay doonayaan in

ay ku daraan qaybta la xiriirta turjumida dhaqanka qowmiyada ay ka turjumayaan, oo ay turjubaanadu ogolaadaan waa in loo sheegaa shirka iyo kazoo qaybgalayaashab in la bixinayo laba nooc oo adeegaas ah, (turjumida caadiga ah iyo turjumid la xiriirta dhanka dhaqanka). Habsocodka turjubaanimadu waxaa ay soo koobeysaa habkii wada hadaladu u socdeen, taas oo u baahan in wakhti dheeraad ah loogu daro ama la siiyo hawl fududeeyaha ama qofka hawsha daadihinaaya. Waxaa kale oo ay fursad siineysaa kasoo qaybgalayaashu in ay helaan wakhti dheeraad ah oo ay kaga fikiraan wixii ay dhihi lahaayeen. Marka laga wada hadlayo afaf kala gedisan waxaa haboon in aad loo dhegeysto oo buuqa iyo wixii la halmaala la yareeyo, si loo gaaro juedada laga leeyahay iyo waliba si loo fahmo qotada iyo misaanka wada hadaladu ku fadhiyaan.

Turjubaanada, dadka kale ee labada luuqadood ku hadla iyo hogaamiyaasha bulshad waxaa looga baahanyahay in ay caawiyaan bulshadooda oo ay tababaraan qaybo kamid ah bulshada aan afkooda hooyo ahayen ingriisiga, si ay uga qaybqaataan baarita caafimaadka ee aad abaabuleysid. Waxaa loo qeexi karaa ujeedada barista caafimaadka' si ay u taageeran in ay qayb ka qaataan dhinacyada abaabulka iyo jiscinka. Tari waxaa ay u baahantahay hawlo dheeraad ah iyo wada hadalo u baahan sharax badan iyo in la hubiyo in qorshahii la dajiyey uu hirgaley iyo in kale. Haddii la fududeysto qodobkani waxaa uu ku noqon karaa ka soo qaybgalayaasha mid adag oo hoos u dhiga ujeedooyinkii laga lahaa kulanka.

### ***Ku dhaqanka jumlada wadahalada***

Inta ka horeysa inta aadan tusin DVDga, waakuwa qodobo kuu fududeynaaya si wadahaladu u noqdaan kuwo waxsoosaar leh.

- ① Qofwalib waa in uu is baraa dadka intiisa kale, oo uu sheegaa magaciisa iyo meesha uu kasoco iyo waliba waxa uu qabto.
- ② Ka qayb qaado kooxda aad ka tirsantahay, si aad u abuurtaan shuruucda lagu dhaqayo wada hadaladiina, qaar ka mid ah shuruucdaasi waxaa ay noqon karaan.
  - a) isixtiraamid
  - b) in loo ogolaado in uu qof kali ahi hadlo markiiba
  - c) in wax la isla ogolaado ama la isla dogolaan waayo

- 3 Isku dey in aad abuurto jawi aad ku ogaan kartid in in ay haboon tahay in ay kasoo qaybgalayaasha isweydin karaan su'aalo lagu xaqiijinaayo in ay fahmeen aaraahad ay dadku isdhaafsanyaayan oo dhan, laakiin taasi ma aha in ay kugu abuurto in aad ka shakidid.
- 4 Qorshahaaga ku darso sidii aad uga hortagi lahayed haddii ay timaado waxyaabo aan habooneyn ama dabeecado aan caadi ahayen.
- 5 Soo bandhig ujeedada barmaamijka/DVDga iyo waxa aad uga danleedahay barista caafimaadka ee nooaas ahba.

Markaad DVDga tusti kadib, samee qodobadan:

- 1 Kasooqaybgalayaashu ha ka wada xaajooden waxayaabihii ay kala kulmeen mudadii uu kulanku (barmaamijku) socdey ee ay ahaayeen kooxkooda yaryar, waxaa fiican in ay ku saleeyaan dhaqamada kala gedisan oo ay isticmaalaan turjubaano haddii loo baahdo mudo gaabon oo ilaa iyo 5 daqiiqadood ah.
- 2 Kasooqaybgalayaashu waa in ay wadaagaan waxkasta oo dhexmarey kooxaha ay ka tirsanyihiin oo dhan (fiiri su'aalaha bilowgooda).
- 3 Isticmaal su'aalaha bilowga ah, si ay wadahaladu u sii socdaan oo ay ugu taagnaadaan tubtii loogu talagaley.
- 4 Haddii ay wadahaladu ka baxaan tubtii ay ku taagnaayeen, waa shaqada qofka hawl-fududeeyaha ah in uu ku soo celiyo tubtii ay ku taagnaayeen, oo uu xusuusiyo kooxaha ujeedooyinka wadahalada iyo in uu bilaabo su'aalo uu tubta markale dib ugu soo celinaayo, si ay wadahaladu ugu socdaan sidii loogu talagaley.

## Suaalaha laga wada hadlaayayo

Maadaama ay dadka qaxootiga ahi soo mareen heerar kala duwan, si ay ula qabsadaan bulshada inteeda kale. Hawsha la soodiyaariyey iyo barista caafimaadkuba waa in ay noqdaan silsilad wada hadalo ah oo isku xiran, ma aha in ay noqoto mid kali u taagan. Waakuwan qaar ka mid ah su'aalihii iyo jawaabihii, si aad tixgalin u siisid in wadahaladu u dhacaan xili hore oo ku haboon.

### ***Cutub: Qodobo la xiriira si-dii loola qabsan lahaa goobta kugu cusub***

- 1 Waamaxay khibrada aad u leedahay in aad la qabsatid meel ama bulsho kugu cusub ama aad caawisid qof u baahan in uu la qabsado meel ama bulsho uu ku cusubyahay, ma waxaad uga qayb qaadatey adiga oo kaligaa ah mise waxaad uga qayb qaadatey adiga oo matalaya urur ama bulsho aad ka tirsantahay?
- 2 Waamaxay waxyaabaha la xiriira dhaqanka kalagedisan ee aad ka dhaxashey ama aad la wadaagtey bulshadaas? (sida caruurta, waxbrashada)
- 3 Waamaxay hababka ugu haboon ee ee aad u wajihi lahaeyd xadaarada iyo wadahalada guud ee dhaqanka u ah bulshadaas?

*Miro waxsoosaar leh:* Is-kudey in wadahaladu sii socdaan oo dadka meesha joogaa ka wada qaybqaataan, kadibna bilow in aad abuurto hab wanaagsa oo dadka kala dhaqanka ahi isku fahmi karaan iyagoo eegaya waxa ay skaga midka yihiin iyo waxa ay ku kala duwanyihiinba. Kasoo qaybgalayaashu waxaa ay hakaas kalka tagi doonaan Isfahan fiican oo ku saabsan habkii ay u wadaagi lahaayeen dhaqamadooda iyo habkii ay kor ugu qaadi lahaayeen dhismaha bulsho isfahansan oo u adeegta koruqaadida dadko oodhan iyo waliba in ay yeeshaan dhaxdooda xiriir fiican oo joogta ah.

### ***Cutub: kamidnoqoshada Bulsho isku ujeedo ah***

- 1 Waamaxay tusaalooyinka dhabta ah ee la raaci karo si dadka qaxootiga ahi u dhexgalaan bulshada inteeda kale, maxaadse fileysaa in natiijo laga

gaari karo si loo helo bulsho leh wada shaqeyn gaar ah arimaheeda gudaha ama la shaqeysa bulshada inteeda kale, oo badala habka hadda jira ama ay bulshooyinku u wada shaqeeyaan wakhtigan xaadirka ah.

*Miro waxsoosaar leh:* dadku waxay la yimaadaan ficrado cusub iyo awood wanaagsan oo ay ku abuuri karaan bulsho caafimaad qabta.

***Cutub: Dhexgalka bulshad ee qaxootiga waa sida jid laba dhinac u socda oo kale.***

- 1 Waamaxay tusaalah ama aragtida aad ka qaadetey DVDga ee la xiriirta ama ku saabsan isdhexgalka qaxootiga iyo bulshada inteeda kale in uu la mid yahay jid laba dhinac u socda oo kale?
- 2 Waamaxay tusaalooyinka ama aragtia aad ka sheegi kartid habka ugu wanaagsan ee dadka cusubi ula qabsan lahaayeen in ay dhaxgal la sameeyaan bulshada inteeda kale?
- 3 Waamaxay waxyaabaha looga baahanyahay in ay u qabtaan dadka dagaanka ku sii noolaa dadka qaxootiga ah, si ay u soo dhaweeyaan dadka ku cusub dagaankooda?
- 4 Waamaxay faaiidooyinka lagahelo gaar ahaan dhanka caafimaadka, marka ay dhamaan bulshadu si wadajir ah u abuurto in uu hirgalo isdhexgal labada dhinac u socda?

*Miro waxsoosaar leh:* ka soo qaybgalayaashu waxay wadaagayaan ama is dhaafsanayaan fikrado lagu ogaanayo goobta iyo habka bulshadoodu ugu xirmi lahayed si ay isu dhaafsadaan fikradahooda, gaar ahaan iyo tusaalooyinka lagu qaadayo talaabooyin haboon oo isdaddal leh.

***Cutub: Is- kuxirnaanta bulshada iyo caafimaadka***

- 1 Ma fileysaa in ay kordhin karto isku xirnaanta awooda caafimaadka bulshad haddii la abuurto umad ka wada qaybqaadato horumarka guud ee caafimaadka bulshada?

*Miro waxsoosaar leh:* dadku waxay la imaanayaan is- afgarad wanaagsan oo ku saabsan arimahooda bulshada, taas oo keeni karta in ay guul ka gaaraan abuurida bulsho fiican oo caafimaad qabta.

### ***Cutub: Wadaagida goobta kulanka iyo mashruuca***

- ❶ Bulshadu ma haysataa, oo maheli kartaa meel ama goob wanaagsan oo ay ku kulanto, taas oo ah goob ku haboon si dadku uga soo wada qayb galo?
- ❷ Waamaxay fikradah wanwanaagsan ee lagu abuurto karo meel ku haboon kulanka iyo xadaarad fiican oo isbadda keeni karta?
- ❸ Waamaxay tusaalooyinka la taaban karo ee looga faaiideysan karo si ay u hirgasho wadashaqeynta bulshada guud ahaan, maxaa fikrado kale ah oo ay dadku qabaan?
- ❹ Waamaxay hababka ugu haboon ee wakhtigan xaadirka ah lagu dhisi karo bulsho wada shaqeyn wanaagsan leh?

*Miro waxsoosaar leh:* ka soo qaybgalayaashu waxay wadaagayaan ama is dhaafsanaan fikrado lagu ogaanayo goobta iyo habka bulshadoodu ugu xirmi lahayed si ay isu dhaafsadaan fikradahooda, gaar ahaan iyo tusaalooyinka lagu qaadayo talaabooyin haboon oo isdaddal leh.

### ***Cutub: Mustaqbalka***

- ❶ Waamaxay aragtidaada ku wajahan dhismaha bulshada ee 10ka sano ee soo socota ?

*Miro waxsoosaar leh:* Ka soo qaybgalayaashu waxay fursad u heli karaan in ay abuuraan, soona bandhigaan aragtidooda ku saabsan isu keenida bulsho caafimaad qabta.

## Ilo dheeraad ad

Si aad u heshid ilo dheeraad ah oo la xiriira isdhex galka dadka qaxootiga ah iyo habkii ay ula dhaqmi lahaayeen bulshada inteeda kale, fadlan soo booqo barta internetka ee ciwaankeedu yahay [www.bcbsmnfoundation.org](http://www.bcbsmnfoundation.org), kadibna riix (Explore the Issues>Social Determinants of Health>Immigrant Integration and Health).

Si loo ogaado waxii la xiriira arima caafimaadaka iyo dad dhexgalka bulshada ee qaxootiga waa in talaabo talaabo loo raaco qorshayaasha xanbaarsan xiisaha iyo guusha bulshadu ka gaarto isu imaatin aqoon kororsig ah oo lagu tala galey guud ahaan bulshaweynta oo dhan iyo dhisida in xooga la saaro wax qabad dhab ah oo lagu gaarsiinayo dadka qaxootiga ah in ay la qabsadaan arimah xasaasiga ah ee siyasada bulshada, fiiri (Fieldstone Alliance Nonprofit Guide to Conducting Community Forums: Engaging Citizens, Mobilizing Communities), oo ku saabsan buug ka sheekeynaaya isku xirka muwaadiniinta si ay uga faaiideysato bulshadu buugaas oo ay diyaariyeen ama ay qoreen Linda Hoskins iyo Carol Lukas.

Maalgalint bulshadeena: Isku-dubaridid iyo dib u habeyn kusaabsan siddii ay dadka qaxootiga ahi ula qabsan lahaayeen bulsha weynta kale, waxna uga baran lahaayeen ayaa waxaa la isweydiyey su'aalo abuurey in la hirgaliyo, sanadki 2006dii, maalgalin arintaas la xiriirta, taas oo keentey in si fudud loo darso si loo fahmo dadka qaxootiga ah laftooda, taariikhdooda iyo habka ugu wanaagsan ee ay ula qabsan karaan bulsha weynta kale iyo waliba in wax laga ogaado meelaha ay daganyihiin, habdhaqan dhaqaaleedkooda iyo arimahooda bulshada, si loo ogaado dhaxgalkooda ay la sameeyaan dadka kale iyo baahidooda manta eek u sabsan mustaqbalkooda iyo tan bulshada ay ku dhexnoolyiinba. Si loo ogaado in arimahaasi hirgaleen iyo inkale waxaa loo baahanyahay in la ogaado Hay'ada asaaska u aha dhidib u taagida iyo waliba isu keenida bulshada oo la doonayo in ay ka wadaqayb qaataan. Habka isdhexgalka bulshada waxaa lagu gaaraa lix jid oo la ogaadey in haddii laraaco ay noqonkaraan kuwo lagu gaaro wixii la higsanaayo oo isdhexgalka bulshada ku saabsan, iyo waliba hababka bulshadu u kala faa'iideystaan, ha ahaadeen kuwa cusub ee hadda yimid iyo kuwii hore ee meesha ku sii noolaaba. Fadlan soo booqo barta internetka ee ah [www.gcir.org/publication/toolkit](http://www.gcir.org/publication/toolkit).

## Gudiga la talinta

Waxaa mahad iyo amaan iska leh shakhsiyaadkii gacanta weyn ka geystey isku dubaridida iyo soo saarida barmaarnijkan iyo qaabka hadal sweydaarsiga ah ee uu u habeysyahayba, waxaa shakhsiyaadkaas ka mid ahaa:

James Anderson, oo ka socdey waaxda arimaha bulshada iyo adeega dadweynaha ee Ramsey County

Gus Avenido, oo ka socdey xafiiska Minnesota u qaabilsan dib-u dejinta qaxootiga

Katherine Fennelly, PhD, oo ka socotey Kuliyada ama macadka arimah bulshada ee Hubert H. Humphrey

Jose Gonzalez, oo ka socda ama ah hubiyaha habka loo diyaariyo qoraalada lagu dalbanaayo samafalka, (Grantmakers Concerned with Immigrants and Refugees) ee qaxxotiga dadka iyo dadka kale ee cusub

Luke Heikkila, oo ka socota Telefishinka Bulshada ee Magaalooyinka Mataanaha ah

Louis Hohlfeld, PhD, oo ka socota xarunta horumarinta iyo siyaasada reer miyoga ama arimaha dagaanka ka baxsan magaalooyinka waaweyn

Nan Kari, oo ka socota xarunta dimuqraatiyada iyo muwaadinimada

Ann Morse, oo ka socota shirarka wadaniga ah ee ay qabtaan sharcidajiyaasha gobaladu

Ann O'Fallon, oo ka socota wasaarada caafimaadka ee Minnesota qaybta u qaabilsan arimaha caafimaadka qaxootiga

Keith Parker, oo ka socda Telefishinka Bulshada ee Magaalooyinka Mataanaha ah

Magui Rubalcava, oo ka socota afarta malgalineed ee xorta ha

Daranee Petsod, oo ka socda ama ah hubiyaha habka loo diyaariyo qoraalada lagu dalbanaayo samafalka, (Grantmakers Concerned with Immigrants and Refugees) ee qaxxotiga dadka iyo dadka kale ee cusub

David Scheie, oo ka socota xarunta Touchstone ee iskaashiga iyo dabagalka

## Arimo la xiriira hay'ada

Himiilooyinka Hay'ada maal galinta ee Blue Cross and Blue Shield of Minnesota Foundation ee gobalka Minnesota waxaa ka mid ah in ay dib u eegto muhiimada xanaanada caafimaadaka ee wakhtigan xaadirka ah ama maanta ka jira Minnesota iyo in ay soo uruuriso fikrado lagu hagaajinaayo caafimaadka guud ee bulshada barrito. Iyadoo xooga saaerysa muhiimada ay leedahay arimaha bulshada, dhaqaalaha iyo deegaanka ee laxiriira caafimaadka iyo waliba hab nololeed caafimaad qab leh oo ku saabsan ka qayb galka ilaha xanaanada caafimaadka. Shaqada iyo himiilooyinka hayadani waa mid ka qoto dheer habakii hore ee loo sameyn jirey xiriirka iyo isdhexgalka bulshada ee ku aadan xanaanada caafimaadka, si loo horumariyo caafimaadka bulshada ee wakhtiyada soo socda la rabo in uu ahaado iyo in la daboolo farqiga u dhaxeeya ilaha caafimaadka ee raadka ku leh dadka kunool gobalka Minnesota oo dhan. Ilaa iyo in tii la sameeyay 23tan sanadood kahore hay'adani (Foundation) oo taakuleysa ururada samafalayaash ah waxay noqotey hay'ada ugu weyn gobalka Minnesota ee sameysa ururo badan oo samafalayaal ah (grantmaking), waxay guud ahaan ku can baxadey in ay wax ka qabato taageerida horumarka caafimaadka ee Minnesota, iyada oo bixisey kaalmo lacageed oo ka badan \$25 mayuun oo doolar.

Maalgalint iyo taageerada ay geysato hay'adani (Foundation) waxuu ka koobanyahay sameynta ama abuurida ururo samafalayaal ah oo sameeya qoraalada lagu dalbado samafalka (grantmaking), sameynta xiriirka dadweynaha, wacyi galin ku saabsan caafimaadka guud ee bulshada, taageerida siyasadeed ee caafimadka la xiriirta, iyo soo saarida hogaamiyaal wax ka qabta horumarka caafimaadka ee bulshada ku dhaqan Minnesota oo dhan.

Hay'adani (Foundation) waa xubin ka tirsan, asaasna u ah diyaarinta iyo isku-dubaridida maalgalinta ururada samafalayaasha ee ay ku bahoobeen reer Minnesota (Minnesota Council on Foundations).

Waxaan ka mid ah go'aanadeeda in ay ka shaqeyno sidii ay wada shaqeyn ula yeelan lahayn ururada kale ee samafalayaasha ah ee ka dhex shaqeyya bulshada kudhaqan gobalka Minnesota. Si ay u buuxiso aragtideeda

guud ee ku wajahan wax ka qabashada caafimaadka guud ee bulshada ku dhaqan Minnesota, taas oo u baahan ka soo qaybgalka urura badan iyo shaqsiyaad badan oo ka qayb qaata dhisida bulsho wanaagsan oo caafimaad qabta. Waxay Hay'adani ku dadaaleysaa oo ay balan qaadeysaa in ay la qaybsaneyso oo ay la kaashaneyso ururada samafalayaasha iyo bulshada in teeda kalaba tababarada, aqoon sweydaarsiyada iyo cashirada laga korodhsadey kulamada ay qabanqaabiso oo qoraal ah.

Haddii aad ka soo wacaysid Magaalooyinka Mataanaha ah iyo nawaaxigooda, Fdlan la soo xiriir Teleefanka ah **(651) 662-3950**, haddii kale oo aad joogtid meel ka baxsan Magaaloyinka Mataanaha ah, fadlan la soo xiriir Teleefanka la'cag la'aanta ha (toll free) ee **1-866-812-1593**.

Emailku waa: **[foundation@bluecrossmn.com](mailto:foundation@bluecrossmn.com)**

Ciwaanka guud ee barta internetka ee hay'adani waa

**[www.bcbsmnfoundation.org](http://www.bcbsmnfoundation.org)**

\*Si-loo tixgaliyo dhaqamada umadaha kala gedisan waxaa halkan lagu soo bandhigeysa shaqada ay qabato xarunta demiqraatiyada iyo muwaadiniinta ee (Democracy and Citizenship) ee Hubert H. Humphrey ee isku duwda howlaha guud ee bulshada, taas oo hoos timaada Hay'ada maalgalinta iyo samafalayaasha u qaabilsan horumarinta bulshada iyo sameynta qoraalada lagu dalbanaayo kaalmada ururada samafalayaasha ah (grantmaking). Si loo horumariyo caafimaadka, loogana qayb qaato oo si wadajir ah loogu abuuro bulsho ay ka mid yihiin Mareykanka cusub (New Americans).

